



DOWLADDA SSC-KHAATUMO EE SOOMAALIYA

WASAARADDA MAALIYADDA

XEERKA CIIDANKA ILAALIDDA CASHUURAHA

Xeer Lr. XX/XXXX

DRAFT

QAYBTA 1AAD

QODOBBADA GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeerka

1. Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Ciidanka Ilaalidda Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo, Xeer Lr. XX/XXXX.

Qodobka

2aad Eray-bixin

1. Haddii aan tuduca ay ku jiraan macno kale u yeelin, kalmadahan soo socdaa waxa loo fasirayaa sidan:
 - a. **Ciidanka:** Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo.
 - b. **Wasaaradda:** Wasaaradda Maaliyadda Dowladda SSC-Khaatumo.
 - c. **Hoggaamiye:** Hogaamiyaha Dowladda SSC-Khaatumo.
 - d. **Taliye:** Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.

Qodobka 3aad

Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerkan waa in la dhiso, lagu hago, lana nidaamiyo shaqada, waajibaadka, iyo awoodaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo si loo sugo dakhliga iyo dhaqaalaha Dowladda.

1. In la aas-aaso nidaam sharciyeed oo rasmi ah oo qeexaya jiritaanka, awoodaha, waajibaadka, iyo anshaxa Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
2. In la xaqiijiyo ilaalinta iyo suurtagelinta ururinta dakhliga Dowladda iyada oo la adeegsanayo ciidan si gaar ah u tababaran oo u heellan fulinta xeerarka canshuuraha.
3. In la xoojiyo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo maamulka hantida Dowladda ee la xiriirta nidaamka cashuuraha iyo kastamyada.
4. In la dardargeliyo iskaashiga u dhexeeya Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, Wasaaradda Maaliyadda, iyo hay'adaha kale ee dawladda iyo kuwa caalamiga ah ee la shaqeeya.
5. In la sugo nabadgelyada goobaha dakhli ururinta iyo la dagaallanka musuqmaasuqa, lunsiga cashuuraha, iyo dhaqaale-hoosaadka.

6. In Xeerkan noqdo hagaha rasmiga ah ee lagu hago dhismaha, hawlgalka iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha si waafaqsan sharciga iyo danaha qaranka.

Qodobka 4aad

Baaxadda Xeerka

1. Xeerkan waxa uu ka dhaqan galayaa dhammaan deegaanada Dowladda SSC-Khaatumo, wuxuuna khuseeyaa dhammaan xubnaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
2. Xeerkan waxa lagu dabaqayaa danbiyadda kala duwan ee ka dhaca xuduud biyoodka Dowladda SSC-Khaatumo.
 - a. Xeerka waxa lagu aasaasey Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo.
 - b. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu wuxuu xilkooda iyo waajibaadkooda u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka Dowladda SSC-Khaatumo, xeerkan iyo shuruucda kale ee khuseeya hawlhooda.

QAYBTA 2AAD

AASAASKA CIIDANKA ILLAALADA CASHUURAHA DOWLADDA KHAATUMO

Qodobka 5aad

Aasaasidda Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Xeerka waxa lagu aasaasey Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo.
2. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu wuxuu xilkooda iyo waajibaadkooda u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka Dowladda SSC-Khaatumo, xeerkan iyo shuruucda kale ee khuseeya hawlhooda.

Qodobka 6aad

Shakhsiyadda Qaanuun ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo waxa uu noqonyaa hay'ad dawladdeed oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, yeelanaysana xeer hoosaadyo iyo qaab dhismeed u gaar ah.
2. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waxa uu hoostagaa Wasaaradda Maaliyadda, waxaana uu yeelanayaa madaxbanaanidiisa maamul, miisaaniyadeed iyo gudasho hawleed.

Qodobka 7aad

Astaanta Ciidanka Ilaaladda Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah.

2. Astaanta Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waa qoraal wareegsan oo uu ku dhexyaal:
 - a. Calaamad 1,
 - b. Calaamad 2,
 - c. Calaamad 3,
3. Astaanta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha Dowladda SSC-Khaatumo cidii isticmaasha ee aan ogolaansho ka haysan taliska ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxay mutaysanaysaa ciqaab ganaax ah.

Qodobka 8aad

Xarrunta Taliska iyo Xarun Goboleedyada

1. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waxa uu yeelanayaa Xarun talis iyo Xarumo Goboleedyo.
2. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waa in uu aasaaso oo yeesho xarun talis guud, xarun goboleedyo iyo baro ilaalo oo ku baahsan xadka Dowladda SSC-Khaatumo si uu u sugo nidaamka cashuuraha, uga hor tago barmuudada, u sugo ammaanka dadka, hantida iyo faydada dhawrka dhulka.
3. Dhismaha Xarunta taliska, xarun goboleedyada, baraha ilaalada iyo nidaamkooda maamul waxa lagu qeexayaa xeer nidaamiye ka dheegma xeeran.

QAYBTA 3AAD

HAWLAHA, WAAJIBAADYADA IYO AWOODAHA CIIDANKA ILAALADA CASHUURAHA

Qodobka 9aad

Xadka Awoodda Fulineed

1. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu wuxuu leeyahay awood fulineed oo la xiriirta kormeerka, baarista, iyo la dagaallanka musuqmaasuqa cashuuraha.
2. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu waxay ay ku koobantahay gudaha xad Dowladda SSC-Khaatumo.
3. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu waxay wax ka soo qaban karaan ama eryasho ka samayn karaan meelaha ka baxsan xuduuda dowladda haddii laga fursan waayo.

Qodobka

10aad Waajibaadka

Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu si waafaqsan xeerarka dalka u gudanayaa waajibaadkiisa, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. Fulinta xeerarka Maaliyadda iyo cashuuraha ee heer qaran iyo heer gobol.
2. Fulinta xeer hoosaadyada iyo tilmaamaha Wasaaradda Maaliyadda ee la xiriira kormeerka, ururinta, iyo ilaalinta dakhliga dowladda.
3. Sugidda amniga iyo badqabka xarumaha cashuuraha, kastamyada, iyo meelaha dakhliga laga ururiyo.
4. Sugidda amniga shaqaalaha goobaha cashuuraha ama howlgalka ku jira.
5. Sugidda badbaadada hantida dadweynaha ee ku jirta gacanta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
6. La-dagaallanka musuqmaasuqa iyo ka hortagga tuugada cashuuraha iyadoo lala shaqaynayo hay'adaha garsoorka iyo kuwa dabagalka.
7. La dagaalanka iyo dabar goynta kotorobaanka iyo mukhaddaraadka.
8. Ka hortagga iyo baarista dhacdooyinka la xiriira lunsashada, leexsashada ama baabi'inta hanti dowladeed oo si toos ah ama si dadban ugu xiran cashuuraha.
9. Joojinta iyo ka hortegidda in badeeco laga soo geliyo ama laga saaro meel aan kastam ahayn.
10. Ka qeyb qaadashada hawlaha la xariira dabagalka iyo ururinta warbixinno ku saabsan dhaqaalaha aan la nidaamin iyo canshuur-baxa sharci darrada ah.
11. Nidaaminta, ilaalinta iyo hagaajinta faylasha u gaarka ah ganacsatada (Archivio).
12. La socodka badeecadaha daruuriga ah, meelaha lagu kaydiyo, qiimaha la siiyo.
13. Kala shaqeynta Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale ee dowladda si loo hirgeliyo siyaasadaha canshuuraha iyo kor u qaadista dakhliga.
14. Iskuxeridda iyo wadashaqaynta Booliiska iyo hay'adaha kale ee dawliga ah
15. Hubinta iyo dib u eegidda badeecadaha marka kastamadu ay soo canshuuraan iyadoo laga eegayo xaga tirada, noocyada, iyo canshuurtii laga qaaday.
16. Kaalin ka qaadashada wacyigelinta bulshada ee ku saabsan waajibaadka bixinta canshuur iyo doorka cashuurtu ku leedahay horumarka bulshada.
17. Fulinta awaamiirta Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyo Wasiirka Maaliyadda ee la xiriira ilaalinta, kormeerka iyo fulinta xeerarka cashuuraha.
18. Ka qaybgalka sugidda nadangelyada marka loo baahdo, howshaas oo ay u hoos imaanayaan qaybaha ama saldhigyada caadiga ah ee Booliiska Gobolka.
19. Marka ay jirto xaalad deg-deg ah ama dagaal, waxaa waajib ku ah Ciidanka Ilaalada Cashuuraha in uu gacan ka geysto difaaca qaranka iyadoo uu la shaqaynayo ciidamada qalabka sida ee ku howlgala difaaca gudaha.

Qodobka 11aad

Awoodaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanku wuxuu leeyahay awood sharci si uu u joojiyo, u baaro, una dacweeyo cid kasta oo ku xad-gudubta xeerarka maaliyadda iyo kuwa cashuuraha.
2. Awoodaha Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu waxa ay gaadhsiisan tahay xudduudaha Dowladda SSC-Khaatumo, si waafaqsan Xeerkan, xeerarka maaliyada iyo dhamaan xeerarka kale ee khuseeya, isaga oo la shaqaynaya hay'adaha kale ee Dowladda.
3. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu yeelanayaa awoodahan soo socda:-
 - a. Joojinta, ka hortaggo iyo baadhista gaadiidka dhex gooshaya xuduudaha SSC-Khaatumo.
 - b. Xidhidda, haynta iyo wax waxweynta dadka lagu tuhmo in ay faldambiyeedyo maaliyadeed galeen.
 - c. Uruurinta caddeymaha iyo qaadista wareysiyada dadka loo xidhay falal lid ku ah maaliyadda iyo ku wareejinta xeer-ilaalinta awoodda u leh si dawladdu ugu oogto si waafaqsan xeerarka Dowladda.
 - d. Ioojinta iyo baadhista gaaddidka gooshaya;
 - e. Qabashada walxaha iyo hantida khuseeya fal- dembiyeedyo la galey (dhacay);
 - f. Qaadista wareysiyada dadka eedaysanayaasha ah, kuwa xidhan iyo kuwa loo haysto faldambiyeedyo maaliyadeed.
 - g. Ka hortagista in xuduudaha SSC-Khaatumo lagu soo galo sifo aan waafaqsanayn sharciga ama xadgudub ku ah shuruucda caalamiga ah ama xeerarka Maaliyadda.
4. Ciidanka Ilaalada Cashuurahu waa in uu u fuliyo awoodahiisaas si waafaqsan Dastuurka SSC-Khaatumo iyo xeerarka kale ee ay tahay in la dabaqo.

Qodobka 12aad

Wada shaqaynta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyo Wasaaradda Maaliyadda

1. Ciidanka iyo Wasaaradda Maaliyadda waxay si wadajir ah u shaqeynayaan si loo hagaajiyo nidaamka cashuurta, kor u qaadista dakhliga iyo meel marinta xeerarka maaliyadda.
2. Wasaaradda Maaliyadda iyo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa inay yeeshaan nidaam wada shaqayn oo joogto ah, si loo hubiyo in cashuuraha la soo ururiyo ay waafaqsan yihiin xeerarka iyo nidaamyada Dowladda.
3. Labada dhinac waa inay iska kaashadaan sidii kor loogu qaadi lahaa dakhliga Dowladda.
4. Labada dhinac waa inay iska kaashadaan sidii looga hortegi lahaa musuqmaasuqa iyo ku takrifalka hantida dadweynaha.

5. Wasaaradda Maaliyadda waa inay siiso Ciidanka Ilaalada Cashuuraha tababarro iyo qalab casri ah si ay u fududaato fulinta waajibaadkooda.
6. Labadan hay'adood waa inay si dhow uga wada shaqeeyaan ilaalinta xuduudaha Dowladda, si looga hortago badeecadaha sharci-darrada ah ama kuwa cashuurta ka baxsada.
7. Waa muhiim in labada dhinac ay yeeshaan nidaam fudud oo lagu wadaago xogta muhiimka ah ee la xiriira cashuuraha iyo dhaqaalaha, si looga fogaado khaladaadka iyo dib u dhacyada.

Qodobka 13aad

Abuurida Isgaadhsiinta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ee Dowladda SSC-Khaatumo waa inuu aasaasaa oo hirgeliyaa xarumaha isgaadhsiinta u dhexeeya xarumaha ciidanka, gaadiidka xamuulka iyo ganacsiga, xuduudaha kastamyada, iyo hay'adaha kale ee dowladda ee la shaqeeya ciidanka.
2. Xarumaha isgaadhsiinta ee kor ku xusan waxa uu ciidanku u adeegsanayaa:
 - a. Xidhiidhka gaadiidka xamuulka iyo ganacsiga ee soo gala ama ka baxa xadka Dowladda.
 - b. Xidhiidhka wada shaqeynta kastamyada iyo ilaalada gudaha iyo dibadda ee la xiriira dhaq-dhaqaaqa badeecadaha iyo canshuuraha.
 - c. Xidhiidhka degdegga ah ee ku saabsan warbixinaha ku saabsan musuqmaasuqa, cashuuraha la dhuumashada, iyo falalka liddiga ku ah dhaqaalaha.
 - d. Xidhiidhka xaaladaha degdegga ah sida shilalka, weerarada hubeysan, iyo caqabadaha saameeya hawlaha shaqo ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyo saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda.
 - e. Dhamaan noocyada kale ee xidhiidhka hawlgallada maalinlaha ah ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale ee dowladda.
3. Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu waxa kale oo uu dhisayaa xarunta kaydka xogaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka iyo warbixinaha la xiriira dhaq-dhaqaaqa cashuuraha danabeysan (electronic), si loo helo xog sugan oo waqtigeeda ah oo ku saabsan dhaqaalaha iyo canshuuraha Dowladda.

QAYBTA 4AAD

QAABDHISMEEDKA CIIDANKA ILAALADA CASHUURAHA

Qodobka 14aad

Awoodaha iyo Doorka Hoggaamiyaha

1. Hogaamiyuhu, isagoo ka duulaya talo bixinta Wasiirka Maaliyadda, magacaabaa, xilka ka qaadaa Taliyaha iyo Taliye ku-xigeenka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
2. Hogaamiyuhu, si waafaqsan xeerka darajo bixinta ciidamada, waxa uu u bixinayaa darajooyinka, abaalmarinna iyo billadaha ay mutaystaan Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
3. Hogaamiyuhu waxa uu fuliyaa hawlaha iyo waajibaadyada kale ee uu xeerkan ama xeer kale u siiyey awood sharciyeed.

Qodobka 15aad

Awoodaha iyo Doorka Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

1. Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo matalaya Wasaaradda Maaliyadda, waxa uu leeyahay awoodaha iyo masuuliyadaha hoos ku qoran ee la xiriiira Ciidanka Ilaalada Cashuuraha:
 - a) Dejinta siyaasadda guud ee lagu maamulayo hawlaha dhaqaale iyo miisaaniyadeed ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - b) Ansixinta qorshayaasha miisaaniyadeed, agabka, iyo kheyraadka kale ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - c) La socodka hab-raaca bixinta kharashaadka iyo ilaalinta isla xisaabtanka maaliyadeed ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - d) La shaqeeynta Taliska Ciidanka Ilaalada Cashuuraha si loo xaqiijiyo in dhaqaalaha iyo ilaha dakhliga lagu maamulo si hufan oo waafaqsan xeerarka Dowladda.
 - e) U gudbinta Golaha Wasiirrada warbixinno la xiriiira xaaladda shaqo ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - f) Ka qayb qaadashada dib-u-habaynta, tayeynta, iyo hufnaanta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
2. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu masuul ka yahay hubinta in Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ay helaan agabkooda si joogto ah, iyadoo la raacayo miisaaniyadda la ansixiyay.

Qodobka 16aad

Qaabdhismeedka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeedkan soo socda:
 - a) Taliska Guud, oo ka kooban Taliyaha iyo Taliye Ku-xigeenka Ciidanka
 - b) Waaxda Kormeerka iyo Daba-galka Cashuuraha
 - c) Waaxda Hirgelinta Xeerarka Cashuuraha
 - d) Waaxda Isgaadhsiinta iyo Xog-ururinta Cashuuraha
 - e) Waaxda Farsamada iyo Taakuleynta Ciidanka.
2. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa kale oo uu yeelan karaa waaxyo dheeraad ah oo ku habboon shaqadiisa, si waafaqsan baahida iyo isbeddelka nidaamka cashuuraha.
3. Shaqooyinka waaxyaha kala duwan ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa nidaamin doona xeernidaamyo gaar ah oo uu dejinayo Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu, iyadoo la raacayo xeerkan.

Qodobka 17aad

Qaabdhismeedka Darajada Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu yeelanayaa darajooyinka soo socda:

1. Saraakiil Sare:	2. Saraakiil Dhexe:	3. Saraakiil Xigeeno:	4. Askari:
a. Sarreeye Guud	a. Dhamme	a. Saddex Xadhigle	a. Saddex Alifle
b. Sarreeye Gaas	b. Laba Xiddigle	b. Laba Xadhigle	b. Laba Alifle
c. Sarreeye Guuto	c. Xiddigle	c. Xadhigle	c. Alifle
d. Gaashaanle Sare			d. Dable
e. Gaashaanle Dhexe			e. Dable dhiman
f. Gaashaanle			

Qodobka 18aad

Dirayska Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Dirayska Ciidanka Ilaalada Cashuuraha wuxuu noqonayaa: Labis Xareedi oo dhameystiran iyo kabiihiisa.
2. Saraakiisha iyo saraakiil xigeennada waxay xiranayaan Koofiyad dahabi ah si ay u muujiyaan darajadooda iyo xilkooda.

Qodobka 19aad

Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa hoggaaminaya Taliye.
2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu yeelanayaa darajo iyo mushahar la mid ah saraakiisha sare ee ciidamada, gaar ahaan Heerka Gaashaanle Sare/Sareeye Guuto.
3. Taliyaha, si waafaqsan Dastuurka, waxaa soo magacaabaya Hoggaamiyaha, isagoo tixraacaya aqoonta, waayo-aragnimada, iyo talo bixinta Wasiirka Maaliyadda.
4. Qofka loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa in uu buuxiyaa shuruudahan soo socda:
 - a) In uu ka mid yahay saraakiisha sare ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - b) In uu haysto ugu yaraan shahaadada kowaad ee heer jaamacadeed oo ku saabsan dhaqaalaha, cashuuraha, ama ciidanka.
5. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu leeyahay waajibaadyadan soo socda:
 - a) In uu u hogaansamo Dastuurka iyo xeerarka dowladda iyo kuwa dalka.
 - b) In uu kormeero, isku dubbarido, oo uu hago hawlgallada Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - c) In uu fuliyo xeerarka, siyaasadaha iyo amarada Dowladda ee la xiriiira sugidda dakhliga, ilaalinta cashuuraha, iyo wareegtooyinka laga soo saaro Wasaaradda Maaliyadda ama Madaxtooyada.
 - d) In uu si joogto ah ugu Hoggaamiyaha iyo Wasiirka Maaliyadda gudbiyo warbixin, maalinle ah iyo mid bille ah ku saabsan hawlaha Ciidanka.
 - e) In uu diyaariyo warbixin lix biloodle ah iyo mid sanadle ah oo la xiriirta waxqabadka Ciidanka, una gudbiyo Wasiirka Maaliyadda si uu ugu bandhigo Golaha Wasiirrada.
 - f) In uu la shaqeeyo hay'adaha kale ee Dowladda ee ku lug leh ilaalinta dakhliga iyo cashuuraha si loo helo wada-shaqayn buuxda.
 - g) In uu mas'uul ka noqdo tayeynta iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - h) In uu diyaariyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee ciidanka, una gudbiyo Wasiirka Maaliyadda si loogu daro miisaaniyadda guud ee Dowladda.
 - i) In uu ilaaliyo anshaxa, heykalka, iyo xeerarka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - j) In uu u soo jeediyo una gudbiyo Hoggaamiyaha si uu u ansixiyo dalacsiinta iyo darajo dhimmista saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - k) In uu u soo jeediyo dib-u-eegis lagu sameeyo qaab-dhismeedka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, una bandhigo Wasiirka Maaliyadda si loo ansixiyo;

- l) Isagoo ka duulaya qaab-dhismeedka ansaxsan, ayuu ansixiyaa shaqaaleynta xubno cusub ee loogu darayo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha;
- m) Gelista heshiisyo waafaqsan xilka/awoodda Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyo sifaha uu qeexayo xeerku.

Qodobka 20aad

Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ku-xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu leeyahay darajo u dhiganta Gaashaanle Dhexe ama heerka u sarreeya ee saraakiisha dhexe, waana sarkaalka labaad ee ugu sareeya ciidanka.
2. Hoggaamiyaha Dowladda ayaa magacaabaya Ku-xigeenka Taliyaha kadib marka uu helo talada Wasiirka Maaliyadda.
3. Ku-xigeenka Taliyaha waxa uu gudanayaa waajibaadka Taliyaha marka Taliyaha maqan yahay ama uu jiro duruufo kale oo shaqo.
4. Ku-xigeenka Taliyuhu waxa uu fulinayaa waajibaadyo iyo hawlo kale oo uu Taliyuhu u igmado ama u wakiisho.
5. Ku-xigeenka Taliyuhu waxa uu hoostagaa Taliyaha Ciidanka isla markaana waxa uu si joogto ah u siiyaa warbixinno la xiriiira shaqada iyo hawlgallada ciidanka.

Qodobka 21aad

Shaqo Kasaaris/Eryidda Taliyaha ama Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Hoggaamiyuhu, isaga oo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda, waxa uu awood u leeyahay in uu shaqada ka fadhiisiyo Taliyaha iyo/ama Ku-xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, haddii:
 - a. Uu soo gudbiyo codsi shaqo ka fadhiisi.
 - b. Uu muddo saddex bilood ah kari waayo gudashada waajibaadkiisa sababo la xiriiira xaalad caafimaad.
 - c. Uu gudan waayo hawlaha iyo waajibaadyada saaran xilkiisa.
 - d. Lagu helo inuu galay/gashay fal anshax darro culus, iyadoo la raacayo xeerka anshaxa Ciidanka.
 - e. Go'aan maxkamadeed oo kama dambeys ah ku xukumo fal dambiyeed.
2. Marka la eryo Taliyaha ama Ku-xigeenka Taliyaha, haddii aan si degdeg ah loo magacaabin beddelkooda, Hoggaamiyuhu isagoo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda waa inuu si ku-

meelgaar ah ugu dhiibaa jagada sarkaal kale oo xilka sii haya inta beddel rasmi ah la magacaabayo.

QAYBTA 5AAD

XULISTA IYO TABOBARISTA SARAAKIISHA CIIDANKA ILAALADA CASHUURAHA

Qodobka 22aad

Qiimaynta Aqoonta iyo Tabobarka Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, isaga oo kaashanaya Wasiirka Maaliyadda, wuxuu mas'uul ka yahay in uu si waafaqsan xeerkan u fuliyo qiimaynta aqoonta aasaasiga ah ee qofka la shaqeynaya, iyo sidoo kale in uu qorsheeyo tababarro xirfadeed iyo aqooneed oo waajib ah, kuwaas oo loo baahan yahay in la siiyo xubnaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha intay ku jiraan tijaabada shaqo iyo horumarinta aqoonta saraakiisha.

Qodobka 23aad

Shuruudaha Xulashada Saraakiisha, Saraakiil Xigeenka iyo Askarta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Shuruudahan hoose ayaa loo raacidoonaa xulashada **Saraakiisha**
 - a. Qofka sarkaalka loo qaadanayo waa inuu haysto ugu yaraan shahaadada koowaad ee jaamacadda ama kulliyadaha la xiriira maamulka, xisaabaadka, dhaqaalaha ama ciidanka.
 - b. Waa inuu maraa imtixaan aqooneed oo dhammaystiran (xisaab, maamulka, iyo aqoon guud).
 - c. Waa inuu tababar u qaato maareynta iyo sugnaanta amniga, cashuuraha iyo dhaqaalaha.
 - d. Waa inuu helo casharro iyo tababarro la xiriira waajibaadka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
 - e. Ardayga ka qalin-jabiya jaamacadda oo dhammeeya tababar lix bilood ah waxaa la siinayaa derejada hal xidig.
2. Shuruudahan hoose ayaa loo raacidoonaa xulashada **Xulashada Sarkaal Xigeenka**
 - a. Waa inuu qofku ka soo baxay dugsiga sare.
 - b. Waa inuu galaa imtixaan aqooneed guud oo la xiriira maamulka, dhaqaalaha iyo xeerarka.

- c. Waa inuu qaataa tababar muddo saddex bilood ah oo la xiriira hawlaha ciidanka iyo cashuuraha.
 - d. Waa inuu tababar ku qaataa xirfadaha maamul iyo anshaxa shaqada.
 - e. Qofka ku guuleysta tababarka waxa la siinayaa derejada hal xadhig.
3. Shuruudahan hoose ayaa loo raacidoonaa xulashada **Qaadashada Askariga (Dable)**
- a. Waa inuu qofku ka soo baxay dugsiga sare.
 - b. Waa inuu qaato tababar muddo saddex bilood ah oo la xiriira cashuuraha, anshaxa shaqada, iyo dhaqanka ciidanka.

Qodobka 24aad

Nidaamka Loo Soo Xulayo Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Nidaamka loo marayo xulista iyo imtixaanka ciddii ka mid noqonaysa saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu noqonayaa sidan:
 - a. Imtixaan aqoon guud ah oo noqonaya af ahaan iyo qoraal ahaan.
 - b. In la hubiyo caafimaadkiisa jireed, jimicsi iyo adkaysiga jidheed ee uu leeyahay.
 - c. In la mariyo baadhitaan caafimaad jireed iyo maskaxeed.
 - d. In la soo baadho taariikh nololeedkiisa ee la xiriira daacadnimo iyo u hogaansanaan xeerarka maaliyadeed.
2. Natijada ka soo baxda baadhitaannada iyo imtixaannadaasi ayaa lagu salaynayaa go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan in cidda la qaadanayo ay buuxisay shuruudihii aasaasiga ahaa ee looga baahnaa.
3. Nidaamka xulashadu waxa uu ku salaysan yahay mabda'a sinnaanta, ka hortagga takoorka, dheelitirnaanta gobollada iyo ka qaybgalka lab iyo dhedigba.

Qodobka 25aad

Tabobarka Aasaasiga ah ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Cid kasta oo u taagan in ay ku biirto saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, waxaa waajib ku ah inay qaadatao tababar aasaasi ah oo waafaqsan dhammaan tayada iyo shuruudaha ku cad Qodobka 23aad ee Xeerkan.
2. Cid kasta oo qaadata, dhammaysatana tababarka aasaasiga ah waxay kamid noqon kartaa Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, taasoo siinaysa awood sharci ah oo ay ku fuliyaan hawlaha ciidanka iyo ilaalinta nidaamka maaliyadeed ee Dowladda.

QAYBTA 6AAD

NIDAAMKA ANSHAX MARINTA

Qodobka 26aad

Nidaamka Anshax Marinta Saraakiisha Haysa Xil Sare oo Magacaabis ah

1. Cabashooyinka la xiriira fal anshax-darro fudud ama culus ee laga soo gudbiyo Taliyaha, Taliye Ku-xigeenka, ama saraakiil kale oo xil sare haya waxaa baadhaya Guddi Anshax oo uu magacaabayo Wasiirka Maaliyadda iyadoo lala kaashanayo Hoggaamiyaha ama hay'adaha khuseeya.
2. Guddiga Anshaxa waxa ay hubinayaan in uu dhacay fal anshax-darro ah, waxayna u gudbinayaa Hoggaamiyaha talo ku saabsan tallaabada anshax-marineed ee ku habboon in laga qaado ciddii ay cabashadu khusayso.
3. Hoggaamiyaha, isagoo tixgalinaya talo-bixinta Guddiga Anshaxa, ayaa gaadhaya go'aan kama dambays ah oo ku saabsan tallaabada anshax-marineed ee la saarayo cidda ay cabashadu ku saabsan tahay.
4. Haddii falka anshax-darradu uu noqdo mid dambi culus ah, Guddiga iyo Hoggaamiyaha waxa waajib ku ah inay u gudbiyaan arrinta Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Ciidamada si tallaabo sharci ah looga qaado.

Qodobka 27aad

Nidaamka Anshax Marineed Ee Saraakiisha Iyo Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Cabashooyinka la xiriira fal anshax-darro fudud ama culus ee laga soo gudbiyo saraakiisha iyo shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, waxa baadhaya Guddiga Anshaxa oo uu magacaabayo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha si waafaqsan nidaamka uu dhigayo Xeer Hoosaadka Ciidanka.
2. Guddigu waxa uu hubinayaa in uu dhacay fal anshax-darro ah, waxaana uu sidoo kale u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha talo ku saabsan tallaabada anshax-marineed ee ay tahay in laga qaado ciddii cabashadu khusayso.
3. Taliyaha, isagoo tixgalinaya talo-bixinta Guddiga Anshaxa, ayaa go'aan ka gaadhaya tallaabada anshax-marineed ee la saarayo ciddii cabashada laga gudbiyey.
4. Waxaa la sameyn doonaa laba Guddiga Anshax oo kala sareeya si loo helo heer racfaan, hase ahaatee guddiyadani kama noqonayaan maxkamado, balse waxay door muhiim ah ku leeyihiin go'aamada anshaxa ee ciidamada.

Qodobka 28aad

Fal Anshax Darro iyo Nidaamka Anshax Marinta

1. Falka loo aqoonsado fal anshax-darro, tallaabooyinka anshax-marineed ee la mutaysanayo, nidaamka gudbinta cabashada iyo baadhista fal anshax-darro, magacaabista Guddiga Anshaxa, iyo nidaamka go'aan qaadasho waxaa si faahfaahsan u qeexaya Xeer Hoosaad gaar ah oo uu dejinayo Taliska Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyada oo la tashanaya Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 29aad

Dhimashada, Dhaawaca iyo Naafada Xubnaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Xubin ka mid ah Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ee lagu dilo isaga oo gudanaya waajibaadkiisa ciidan, ama lagu dhaawaco si aargoosi ah oo la xiriirta hawlgaal uu ku guda jiray, waxaa masuuliyadda magtiisa ama magteeda qaadaysa Dawladda, waxaana la horgeynayaa caddaaladda cid kasta oo falkaasi ku lug leh.
2. Xubin ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ee lagu dilo hawlgaal sharci ah oo uu fulinayo, waxaa dhibane ka ah Dowladda SSC-Khaatumo, waxaana Dowlad ahaan la qaadanayaa masuuliyadda magtiisa ama daaweyntiisa, iyadoo ciddii dambiga geysatana si degdeg ah loo soo qabto loona horgeeyo sharciga.
3. Xubin kasta oo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ka tirsan oo ku dhaawacma ama naafooba isaga oo gudanaya waajibaadkiisa, waxa uu xaq u leeyahay in Dawladdu si buuxda u daboosho kharashka daaweyntiisa iyo daryeelkiisa caafimaad.
4. Naafada iyo dhaawaca xubnaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiyaha uu soo saarayo Wasiirka Maaliyadda.

QAYBTA 7AAD

XIDHIIDHKA SHAQAALENIMO

Qodobka 30aad

Shaqaaleynta Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu shaqaaleysanayaa laba qaybood oo shaqaale ah:
 - a. Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, kuwaas oo loo dhaarinayo loona xilsaarayo fulinta awoodaha iyo waajibaadyada la xiriira ilaalinta cashuuraha iyo sugidda dhaqaalaha.
 - b. Shaqaale rayid ah oo loo shaqaaleysiiyo fulinta hawlaha maamulka, xisaabaadka, farsamada iyo adeegyada taageerada, balse aan lahayn awood ay ku fuliyaan hawlgallada ciidan ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.

Qodobka 31aad

Mushaharka iyo Magdhawga Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Dajinta nidaamka dhaqaale ee Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa in uu ku salaysnaadaa xaaladooda shaqo iyo waajibaadka gaarka ah ee ay gudanayaan. Mushaharka aasaasiga ah ee saraakiisha waxa uu kala duwanaan karaa iyadoo lagu salaynayo darajada, muddada shaqo iyo khibradda shaqada. Tani waxa lagu go'aamin doonaa Digreeto uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda, iyadoo laga duulayo nidaamka mushaharka ee Ciidamada Dowladda, gaar ahaan Booliiska.
2. Marka laga reebo mushaharka aasaasiga ah, saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa ay xaq u leeyihiin inay helaan kab-mushahar, gunnooyin iyo faa'iidooyin kale. Kharashaadkaas dheeraadka ah waxa lagu salayn karaa:
 - a. xaaladaha adag ee goobta shaqada,
 - b. shaqo dheeri ah (shift differential),
 - c. hawl gaar ah oo la qabto,
 - d. xirfad gaar ah,
 - e. ama shaqo maalmo fasax ah ku beegan.
3. Go'aaminta iyo bixinta mushaharka aasaasiga ah iyo amar bixinta kharashaadka kabka ah waxa lagu saleeyaa nidaamka iyo shuruucda ku qeexan Xeerka iyo Xeer-hoosaadyada khuseeya. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu soo jeedin karaa miisaaniyadda sannadlaha ah ee Ciidanka, oo ay ku jiraan kharashaadka mushaharka iyo kabka ah, si loogu daro Miisaaniyadda Dowladda. Soo jeedintaas waxa loo gudbinayaa Wasiirka Maaliyadda si loo ansixiyo.

Qodobka 32aad

Iskhilaaf Daneed

1. Sarkaalka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa in aanu aqbalin qabashada xil, masuuliyad ama hawl kale oo keeni karta is khilaaf daneed (conflict of interest) taasoo wax u dhimaysa waajibaadyada rasmiga ah ee Ciidanka.
2. Xilalka, hawlaha ama shaqooyinka loo arko inay keeni karaan is khilaaf daneed waxaa ka mid ah:
 - a. In loo magacaabo ama loo doorto xafiis dawladeed ama jago kale oo xukuumadeed.
 - b. Ka qaybgalka ololeyaal doorashooyin ama ka mid noqoshada xisbi siyaasadeed.
 - c. Ka shaqaynta ama ka qaybgalka shaqo ganacsi oo mushahar ama faa'iido dhaqaale laga helo iyadoo aan fasax rasmi ah laga haysan Taliyaha Ciidanka.

- d. Qoraallo ama warar si toos ah ugu saabsan hawlaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha oo loo baahiyo si dadweynuhu u akhriyo, iyadoo aan oggolaansho laga haysan mas'uulka awoodda u leh bixinta fasaxaasi.

Qodobka 33aad

Dalacsiinta, Derejo Dhimista, Shaqo Ka Eryidda iyo Is-casilista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Xeer hoosaad gaar ah ayaa qeexi doona shuruudaha iyo nidaamka loo raacayo dalacsiinta, derejo dhimista, shaqo ka eriga iyo is-casilista saraakiisha iyo shaqaalaha rayidka ah ee ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.

Qodobka 34aad

Mas'uuliyadda Dambi

1. Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha laguma eedeyn karo fal dambiyeed ka dhashay fulinta amarka sharci ah, oo si waafaqsan xeerarka ama difaac sharciga ah u dhacay.

Qodobka 35aad

Mas'uuliyad Madani

1. Sarkaal ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa inuu si degdeg ah ugu warbixiyaa mas'uulkiisa iyo masuulka la siman ee Wasaaradda Maaliyadda wixii khasaare ama dhaawac ah ee uu u geysto qof ama hantidiisa isagoo gudanaya waajibaadka shaqo.
2. Si waafaqsan xeerarka Dowladda, Wasaaradda Maaliyadda waxaa ku waajib ah inay magdhowdo khasaaraha ama dhaawaca dad rayid ah (shaqsiyaad ama shirkado) oo ka dhashay talaabo uu qaaday sarkaal ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha isagoo ku guda jira gudashada shaqo rasmi ah.

Qodobka 36aad

Fayl Gaar ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa inuu yeeshaa fayl shaqsiyadeed gaar ah oo la sameeyo marka shaqada lagu darayo. Faylkani wuxuu ka kooban yahay dhammaan xogta khusaysa shaqadiisa, oo ay ku jiraan:
 - a. nooca shaqada loo qoray,
 - b. tababarrada uu qaatay,
 - c. abaalmarinta iyo ciqaabta la siiyay,
 - d. fasaxyada uu qaatay, iyo

- e. dhacdooyinka kale ee muhiimka ah.
2. Faylka shaqsiga ah waa sir ah. Looma oggola cid kale inay akhrido ama eego xogta ku jirta faylkaas haddii aan oggolaansho cad laga helin Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.

Qodobka 37aad

Dhaarta Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxaa marka la magacaabo ka dib ku dhaaranayaa dhaarta ku xusan faqrada 4aad ee qodobkan.
2. Taliyaha iyo Taliye ku-xigeenka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, marka la magacaabo ka dib, waxa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
3. Dhamaan saraakiisha kale ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa dhaarinaya Maxkamadaha Gobollada iyo degmooyinka.
4. Sarkaalkasta iyo shaqaalekasta waxa uu marka la magacaabo ka dib ku dhaaranayaa dhaarta hoos ku xusan:
 - a. *“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan daacad u ahaanayo Dowladda SSC-Khaatumo; dadkeeda, dalkeeda iyo diinteedaba; iyo in aan u hoggaansamo oo si daacad ah u ilaaliyo Dastuurka Dowladda SSC-Khaatumo iyo xeerarkeeda Maaliyadda, sidoo kalena aan u hoggaansamo amarada madaxda sare ee sharciga waafaqsan. Waxaan ku dhaaranayaa inaan u dhaqmo si sharaf leh, asluub wanaag oo geesinimo xaalad kasta oo lagu jiro, anigoo illaalinaya sirta ciidamada iyo tan shaqada, kuna dhaqaaqaya tallaabo kasta oo lagu sugaayo nabadgelyada, xasiloonida, iyo ilaalinta hantida iyo kor u qaadista dakhliga iyo cashuuraha Dowladda.”*

QAYBTA 8AAD

MIISAANIYADDA CIIDANKA ILAALADA CASHUURAHA

Qodobka 38aad

Miisaaniyadda iyo Maamulka Xisaabaadka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu yeelanayaa miisaaniyad gaar ah oo u madax bannaan isticmaalkeeda.
2. Miisaaniyadda Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa loo maamuli doonaa si waafaqsan Xeerka Xisaabaadka Dowladda iyo Xeer-nidaamiyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, iyadoo la raacayo habraacyo cad oo lagu soo saaray xeerkan.

3. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha iyo saraakiisha uu u igmado ayaa mas'uul ka ah isticmaalka, ilaalinta, kormeerka iyo dabagalka habsami u socodka maamulka miisaaniyadda Ciidanka.

Qodobka 39aad

Biladaha iyo Abaal Marinada

1. Wasiirka Maaliyadda iyo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ayaa awood sharci ah u leh inay siiyaan abaalmarinno, bilado ama shahaado sharafeed saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, iyo cid kasta oo mutaysata abaalmarin gaar ah.

Qodobka 40aad

Hanti Dhawrka

1. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waxa uu dhisayaa Guddiga Hanti Dhawrka ee Ciidanka.
2. Guddiga Hanti Dhawrka waxa uu ka koobnaan doonaa saraakiil ka tirsan Ciidanka Ilaalada Cashuuraha oo leh aqoon iyo waayo-aragnimo ku saabsan maamulka maaliyadda iyo xisaabaadka.
3. Guddigan waxa uu xaq u leeyahay inuu sameeyo baadhitaanno iyo dabagal ku saabsan xisaabaadka iyo maareynta hantida Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.

Qodobka 41aad

Hantida iyo Agabka Ciidanka Ilaalada Cashuuraha

1. Agab kasta oo lama huraan u ah fulinta iyo socodsiinta hawlaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha, waxay ka mid yihiin hantida rasmiga ah ee Ciidanka Ilaalada Cashuuraha.
2. Dhammaan hantida Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa in lagu qoro kuna jiraan diiwaan hantiyeed rasmi ah oo si joogto ah loo habeeyey.
3. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha waa in uu soo saaro awaamiir iyo tilmaamo la xiriira maamulka, maaraynta, ilaalinta, iyo xisaabaadka hantida Ciidanka.

QAYBTA 9AAD

QODOBO KAMA DAMBEYS AH

Qodobka 42aad

Xeer-Hoosaadyo

1. Wasiirka Maaliyadda ayaa leh ansixinta xeer-hoosaadyada lama huraanka u ah dhaqangelinta xeerkan.
2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Cashuuraha wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro tilmaamo iyo amarro maamul oo lagama maarmaan u ah fulinta Xeerkan iyo xeer-hoosaadyadiisa.

Qodobka 43aad

Laalis/Nasakhid Xeerkan

1. Xeerkan wuxuu burinayaa/baabi'inayaa dhammaan qodobbada xeer kasta oo dabcaystiisu ka hor imaanayo Xeerkan, marka laga reebo haddii uu jiro xeer kale oo si cad u oggolaanaya in ay sii socdaan.

Qodobka 44aad

Dhaqangalka Xeerkan

1. Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Baarlamaanku ansixiyaan, Hoggaamiyaha Dowladduna uu saxeexo, laguna daabaco faafinta rasmiga ah.